# Codsiga Wakiilka Midowga
# Shaqaalaha Daryeelka Guriga/PSW

Magaca oo Dhameystiran__________ Taariikhda la Gudbiyay__________

Cinwaanka Guriga (Wadada/Magaalada/Gobalka/Zip-ka)__________

Cinwaanka Boostada (hadii uu ka duwan yahay)__________

IImayl__________ Taleefoonka Gacanta__________ Taleefoonka Fiilada__________

Luuqada La Doorbidayo: ☐ Sbaanish ☐ Ruush ☐ Fiyatnaamiis ☐ Cantonese ama Mandarin ☐ Luuqad kale__________

Nooca Shaqada: ☐ Shaqaalaha Daryeelka Guriga ☐ Shaqaalaha Taageerada Shaqsiyeed
☐ Bixiyaha Daryeelka Shaqsiyadeed (PCA) ☐ ICC

Inta sano aad Midowga ku jirto__________

Fadlan uga jawaab su'aalaha soo socda sida ugu wanaagsan ee aad awoodo, adiga oo adeegsanaya warqad dheeraad ah haddii loo baahdo. Dib ugu celi foomkaaga oo buuxa Wakiilka Guud, HCW ama PSW, ee Local 99. Tilmaamaha waxay ku yaalaan bogga 2-aad.

1. Maxaad ku jeclaatay inaad noqoto wakiilka midoowga shaqaalaha, maxayna kaaga dhigan tahay in la noqdo wakiil adiga?

2. Sidee uga qayb qaadatay midowgaaga shaqaalaha? Fadlan cadee hawlaha, doorarka, tabbabarada, adeega taleefanka ee bangiyada, iwm.

3. Faahfaahi sida khibraddaada shaqo ay kuugu dhiirrigelisay inaad noqoto wakiil.

4. Sidee ayaad ugu adeegsatay xirfadaha dhibaato xalinta shaqadaada, gaar ahaan 12-ki bilood ee la soo dhaafay?

5. Xilal hoggaamineed noocee ah ayaad ka soo qabatay midow shaqaale? Haddadan ma haysaa wax xil hoggaameend ah?

# Codsiga Wakiilka Midowga
# Shaqaalaha Daryeelka Guriga/PSW

**Xeerka Anshaxa SEIU 503**

Waxaa jira mamnuuc ka dhan ah dhibaataynta iyo dabeecadaha kale ee reeban. Tani waxaa kamid ah, balse aan ku ekeyn:

- Hanjabaadaha rabshada wata ama luuqad lagu durayo qof kale
- Kaftanka iyo luuqada takoorka leh
- Kaftanka iyo luuqada dadka naafada ah lagu takooro
- Dhaqan ama luuqad galmo muujisa ama rabshad leh
- Faallooyinka gardarrada ah ee laxiriira jinsiga, aqoonsiga iyo muujinta jinsiga, dookha galmo, naafonimada, cudurka dhimirka, miir-qabka, muuqaalka jirka, jirka, da'da, isirka, dhalashada, luuqada, xaalada qoyska, xaalada dhaqaale, soogalootiga, ama diin
- Dhaqamada galmada ee aan la jecleysanin
- U doodista ama dhiirigelinta mid ka mid ah dabeecadaha kor ku xusan
- Dhibaataynta dadka kale ee soo noqnoqota
- Cabsi gelinta ula kaca ah
- Si ula kac ah ugu yeerida qof jinsi uusan ahayn ama adeegsiga magacyo la diiday si loogu qeexo kooxo dad ah

Aniga oo saxiixayo, waxaan oggolahay inaan raaco xeerka anshaxa marki aan ka qaybgalayo munaasabada Midowga.

Magaca oo Dhameystiran____________________ Taariikhda la Gudbiyay________

Saxiixa______________________________

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga helayaa Seiu503.org/UnionStewards

**Tilmaamaha Gudbinta Foomka**

Fadlan isla saar bogagga 1 iyo 2 (u hayso boggaga 3 iyo 4 diiwaan ahaan).

<u>Ku dir boosto</u>

SEIU 503 Member Resource Center
Attn: Local 99 Steward Application
PO Box 12159
Salem, OR 97309

<u>Shaqsi ahaan u geey</u>

SEIU 503 Member Resource Center
1730 Commercial St. SE
Salem, OR 97302

<u>Fakis ku dir</u>

503-581-1664

# Local 99
# Macluumaadka Wakiilka Midowga

Midowga Caalamiga ah ee Shaqaalayaasha Adeegga (SEIU) Local 503, Midowga Shaqaalaha Dadweynaha ee Oregon (OPEU) waa midowgeena oo ka kooban 90+ Locals oo iskuugu jira shaqaalayaasha adegga ee kala duwan ee Oregon. Qaab dhismeedkeena urur marki loo eego Local kasta wuxuu awood u leeyahay inuu toos u maamulo shaqaalihiisa wuxuuna hoos imaadaa dalladda SEIU 503.

Daryeelkeena Guriga ee Local 99 Homecare waxaa maamula xubnayaasheena loo doortay Golaha Daryeelka Guriga (HCC). Dhammaan codsiyada wakiillada ee la soo dhameystiray ee ay heleen Wakiilada Guud (HCW iyo PSW) waxaa looga shaqayn doonaa iyadoo la raacayo Sharciyada na maamula iyo Siyaasadaha iyo Habraacyada Maamulka (AP&P) kuwaas oo la rabo inay waafaqaan dastuurka SEIU Local 503, Sharciyada, iyo Siyaasadaha iyo Habraacyada Maamulka ( AP&P) waxaana ka mid ah Xeerka Anshaxa (COC).

Dhammaan Wakiilada waa inay yaqaanaan dukumiintiyada maamul ee hadda jira ee Local 99: Heshiiska Gorgortanka lagu Galay (CBA), Sharciyada, iyo AP&P. Waajibaadka wakiilka iyo muddada xilka (2 sano) waxaa lagu qeexay Sub-Local 99: AP&P, Qodobka IX. Wakiilada waxaa loo doortaa shaqaalaha mid ka mid ah sagaalka (9) Degmooyinka HCC ee soo socda (oo loo qoondeeyay degmada, eeg khariidada) - iyada oo lagu saleynayo cinwaankooda deegaan ahaan haddadan ee u diiwaangashan. Dhammaan codsiyada la dhammaystiray waa inay lahaadaan cinwaan degenaansho deegaan oo ay caddeeyaan degmada.

**Masuuliyadaha guud ee Wakiilada Local 99**

- Gaarsiinta shaqaalaha cusub iyo kuwa sii jiray ee deegaankaaga waxyaabaha ku saabsan xubinnimada, CAPE, gorgortanka, iwm.
- Cillad bixinta, xalinta dhibaatooyinka, iyo garashada cabashooyinka
- La shaqeynta Xarunta Macluumaadka Xubnaha (MRC) si loo xareeyo cabashooyinka markii loo baahdo
- U adeegida shaqaalaha isticmaalay MRC, si loogu wareejiyo ka qeybgalkooda howlaha kale ee midowga
- Gacan ka geysashada diiwaangelinta shaqaalaha si ay u codeeyaan, u diiwaangelinta shaqaalaha CAPE, iyo qorista shaqaale kale si ay uga qaybqaataan maalmaha ololaha, shirarka hoolka magaalada iyo dhaqdhaqaaqyada kale ee siyaasadeed ee midowga uu hoggaamiyo.
- Wargelinta Wakiilada Guud ama Xarunta Macluumaadka Xubnaha isbadellada cinwaanka, isbeddelka xaalada shaqada, iscasilaada ama fasaxa maqnaanshaha.
- Magacaabista Wakiilka waa in qoraal ahaan lagu aqbalaa 60 maalmood gudahood laga soo bilaabo ogeysiiska qoran

**Taageerada guud ee shaqaalaha Local 503 iyo Wakiilada Guud**

- Diyaar ahaw marki laguu baahdaba si aad u caawiso adiga oo isticmaalaya taleefon, iimayl, ama shaqsi ahaantaada xad macquul ah.
- Waxay ku siineysaa jadwalka hawlaha ee deegaankaaga, oo ay ku jiraan Tabbabarka Dhaqangelinta Heshiiska (CET) iyo tabbabaro kale
- Waxay kuu siineysaa macluumaadka lagama maarmaanka ah iyo agabyada loo baahan yahay marka aad la hadlayso shaqaalaha Local 99
- Waxay bixisaa tabbabar iyo taageero joogta ah si ay kaaga caawiso aqoonsiga iyo wax ka qabashada cabashooyinka iyo arrimaha
- Waxay bixisaa warbixino socda iyo liisaska dabagalka ee MRC
- Waxay bixisaa macluumaad ku saabsan hawlaha siyaasadeed, ansaxinta musharraxa, iyo macluumaad kasta oo kale si ay kaaga taageeraan dadaalkeenna aan ku dhiseyno dhaqdhaqaaqa shaqaalaha.

## Lambarada Inta Badan la Isticmaalo

| | |
|---|---|
| **Xarunta Caawinta Xubnaha SEIU 503** | **1 (844) 503-7348** |
| SAIF, Ceymiska Shaqaalaha | 1 (800) 285-8525 |
| ACA Kooxda Diiwaangelinta Daryeelka Caafimaadka | 1 (855) 437-2694 |
| Hay'ada Dhaqaalaha Caafimaadka | 1 (844) 507-7554 |
| OR Guddiga Daryeelka Guriga | 1 (877) 867-0077 |
| Laanta Xiriirada Lacag Bixiyaha ee DHS | 1 (800) 241-3013 |
| Laanta Baaritaanka Taariikh Dambiyeedka | (503) 378-5470 ee DHS |

Xafiisyada SEIU

**Portland** (6401 SE Foster Rd) | **Salem** (1730 Commercial St. SE) | **Eugene** (488 E. 11th Ave Ste 200)
**Medford** (1257 N Riverside #7) | **Bend** (925 SE Second St, Suite C) | **Pendleton** (920 SW Frazer, Ste 120)

# Local 99
# Macluumaadka Wakiilka Midowga



District 1
Washington, Multnomah, Clackamas

District 2
Yamhill, Polk, Marion

District 3
Benton, Linn

District 4
Josephine, Jackson, Klamath, Lake

District 5
Eastern Oregon

District 6
Columbia, Clatsop, Tillamook, Lincoln

District 7
Lane

District 8
Coos, Curry

District 9
Douglas

**Kulanka Musharax Xulashada ee Guddiga C&HR**

| | |
|---|---|
| African/ African American (AFRAM) Caucus | AFRAMCaucus@seiu503.org |
| Asian, Desi & Pacific Islander Caucus | Meng Chen at mengc@seiu503.org |
| Indigenous Peoples Caucus | Fernando Cortés Chirino at corteschirinof@seiu503.org |
| Latinx Caucus | LatinoCaucus@seiu503.org |
| Lavender Caucus (LGBTQ+) | LavenderCaucus@seiu503.org |
| Woman of Color Caucus | Luci Whitesell at whiteselll@seiu503.org |